



Wa maxay Maareynta ama Howl isu-duwidda?

(What is Service Coordination? - Somali version)

Ilamaha yar oo ay da'doodu u dhaxeeyso dhalaanka ill'aa 3jir ee u qalma howlaha ka hor-tagga adeegyada iyo qoyskooda, inta badan waxa laga yabaa in ay u baahan yihiin cawinnad iyo howlo lagu saacidayo ilmaha xagga kobicidda iyo barashada. Howlahaan waxey ka koobnaan karan:

- Caafimaadka, oo ay ka mid yihiin kalkaalayaha caafimaadka bulshada iyo garashada nafaqada
- Howlaha bulshada, oo ay ka mid yihiin cawinaad dhaqaale, iyo qoyska oo laga neefiya howlaha
- Barasho ku taqasusan barashada xirfadaha dhan walba oo quseeya kobicidda ilmaha

Mararka qaarkood wey adagtahay nidaamka habka lagu helo howlaha saacida ka hortagga hore. Sharciga loo yaqaan Individuals with Education Act (IDEA) Xaquuqaha Sharciyeed ee Waxbarashada Dadka Naafada leh, waxu faraya qorshaha ka hor-tagga hore ee qoyska in uu ka mid ahaado maareeye isu-duwa howlaha (Service Coordinator). Isu-duwidda howlaha micnaheedu wa nidaam xiriira ee joogta ah, oo ay ka mid tahay saacidaada qoyska leh ilma yar ama dhalaanka ah, oo dib u dhac leh. Tasoo lagu saacidayo in qoysku helaan hab ay uga kheyb qataan howlaha, iyo in ay helaan hab la isugu duwayo howlaha kale ee sharcigu farayo. Howl isu-duwidda wa mid qoyska loo fidiyey, oo howlaha ka hor-tagga hore marnaba qoyska lacag uga baxeyn. Masuuliyadaha saaran qofka fulinaya howl isu-duwidda wa in ay waalidka ka caawiyaan:

- Isu-duwidda qiimeynta
- Fududeynta iyo ka kheyb qaadashada qiimeynta ee ilmaha iyo qoyska, abaabulka, iyo dib u eegista Qorshaha Qaaska ah ee Adeegyada Qoyska (Individualized Family Service Plan IFSP)
- Isu-duwidda iyo la-socodka habka howlaha loo fulinayo, oo ay ka mid yihiin howlaha daawada iyo caafimaadka
- La socodsiiinta qoyska xaquuqahooda iyo hab raaca sharciyeed oo ay ka mid yihiin halka qoysku ka heli karo cid u dooda xuquuqahooda hadii ay qilaaf ka qabaan howlaha.
- Isu-duwidda fidinta dhaqaalaha
- La shaqeynta qoyska iyo xubnaha kale ee ka mid ah kooxda fulisa Qorshaha qaaska ah ee Adeegyada Qoyska (Individualized Family Service Plan IFSP), si ay u abaabulaan qorshe ilmaha kaga gudbayo howlaha ka hortagga hore, oo ay ugu gudbayan waxbarashad qaaska ah ee dugsiga xanaanadda, ama howlaha kale oo ay ka heli karaan jaaliyadda

Tani wa maxey micnaha ay waalidka u leedahay?

Qoyska iyagoo caawinaad ka helaya qofka mareeya howsha, waxey gaari karan go'aan ay garanayan, waxey ka war heli karaan fursadaha jira, waxey heli karaan kheyraadka diyaarka u ah ilmahooda iyo qoyskaba. Mareeyaha iyagoo si xooggan u qadarinaya baahida iyo cabashada qoyska, muhiimadda iyo kheyraadka ay doonayan, waxey qoyska kala shaqeyn karan in ay abaabulan qorshaha qaaska ah ee adeegyada ka hor-tagga IFSP. Qorshaha oo u fidinaya qoyska sacidaad, iyo howlaha muhiimka u ah in lagu qanciyo baahida iyo walwalka qoyska. Natiijyadan howleed waa mid shaqsiyeed, oo waalidka kalsooni ka heli kara, kartina siineysa oo ay kaga qancaan baahida ilmahooda iyo qoyska.